

Shattiyada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

Codsiga Fiirinta Guddiga Racfaanada Sharciga Dabka

La Casriyeyay Sateembar 2014

Xeerka Dabka Seattle (SFC Qeybta 108.1) wuxuu ogol yahay habka racfaanada go'aanada Waaxda Dabka ama talaabada la xariira arjiga iyo turjumada laga sameeyo Sharciga Dabka.

Fursadda ah in la soo gudbiyo raacfaan waxay arjiileyaasha siisaa fursad ay ku soo bandhigaan fikradahooda ku saabsan xaaladaha gaarka ah xagga u hoggaansmida Sharciga Dabka una jeediyan dadka dibadda ka ah Waaxda Dabka Seattle ee aqoonta u leh arrimaha Sharciga Dabka. Racfaanada waxaa firiya Guddiga Racfaanada, guddi hoose oo ka tirsan ugu yaraan shan xubnaha Guddiga La-Tallinta Sharciga Dabka (FCAB).

Guddiga Racfaanada waxaa loo gudbin karaa oo keliya hal codsi oo ku saabsan muranka u hoggaansamida Sharciga Dabka. Joojinta hirgelinta Xeerka Dabka inta la sugaayo tallada la-tallinta guddiga, waxaa go'aan ka gaari doono Madaxa Dabka oo keliya. Xaaladaha ku lugta leh hirgelinta Sharciga Dabka ma hoos yimaadaan dib u dhaca hawsha fiirinta Guddiga Racfaanada.

Talaabada Hore oo lagu Codsado Fiirinta Guddiga Racfaanada

Ka hor inta Guddiga Racfaanada uusan codsanin, arjiilaha waa in uu marka kowaad sahmiyo go'aanka masalada u hoggaansamida soona jeediyu sharuudaaha Sharciga la Baddalay (SFC Qeybta 104.8) ama qoraalo iyo habab kale (SFC Qeybta 104.9). Ka hor inta aan la codsanin fiirinta, arjiilaha waa in uu xaaladda u hoggaansamida si qoto dheer kala hadlo wakiilada soo socda ee Waaxda Dabka Seattle:

1. Fattashaha ku habboon ee ka socda Xafiiskaa Hirgelinta Sharciyada Dabka (FMO), Qeybta Ka

Hortagga Dabka ee Waaxda Dabka Seattle;

2. Kormeeraha fattashaadda FMO, haddii xaaladda aan lala dhamayn karin fattashaha;
3. Hirgelinta Sharciyada Dabka, haddii xaajada aan lala xallin karin kormeeraha; iyo
4. Haddii loo baahdo, Madaxa Dabka, marka aan heshiis lala gaari karin Hirgelinta Sharciyada Dabka; ka hor
5. Inta aan la gudbinin codsi qoran oo ku saabsan fiirinta Guddiga Racfaanada, kuna socota Madaxa Dabka loona diray Hirgelinta Sharciyada Dabka, oo si kooban u sheegta arrimaha ku lugta leh, xaqiqada jirta, iyo qeybta (qeybaha) munaasabka ah ee ka tirsan Sharciga Dabka Seattle.

Dib u eegida iyo Talooyinka

Waxaa lagu dabaqaa waqtiyada kooban ee hoos ku qoran haddii waqtiyo kooban oo kala duwan aysan ku heshinin Waaxda Dabka Seattle, arjiilaha iyo Madaxa FCAB, tusaale ahaan, marka ay jiraan arrimo degdeg ah.

1. **Codsiga qoraalka ee dib u eegida:** Arjiilaha wuxuu Madaxa Dabka u gudbin doonaa codsi qoran uu ku dalbanaaayo dib u eegida Guddiga Racfaanada muddo 10 maalin oo shaqeeyo gudahoodaa kaddib marka Madaxa ogeysiyo arjiilaha go'aanka Madaxa gaaray, gaar ahaan, muranka u hoggaansamida.
2. **Ogeysiinta FCAB codsiga dib u eegida:** Hirgelinta Sharciyada Dabka oo mattala Madaxa Dabka, wuxuu samayn doonaa dadaal macquul ah si uu u ogeysiyo (U gudub bogga xiga)

Madaxa FCAB muddo saddax maalin oo shaqeeyo gudahooda (Isniin ilaa Jimco, marka laga reebo

LAMA QAADIN MAS'UULIYADDA SHARCIGA: Ma aha in Qoraalka Taakuleynta Macaamilka (Client Assistance Memo) (CAM) loo isticmaalo in lagu baddalo xeerka iyo sharciyada. Shakhxiyadka waxay mas'uul ka yahiin u hoggaansamida dhamaan sharuudaha xeerka iyo sharciyada, haddii lagu sharaxay CAM ama haddii aan lagu sharixin.

www.seattle.gov/fire

Fire Prevention Division
220 3rd Avenue South
(206) 386-1450



City of Seattle
Fire Department

- fasaxyada) laga bilaabo marka uu helo codsiga qoran uu arjiilaha ku doono dib u eegida Guddiga Racfaanada. Hirgelinta Sharciyada Dabka wuxuu waqtigaan siin doonaa Guddoomiyaha FCAB koobiga codsiga qoran ee arjiilaha, faks ahaan ama habab kale oo macquul ah.
3. ***Ujeedada dib u eegida:*** Ka hor inta aan la dooranin Guddiga Racfaanada, Guddoomiyaha FCAB wuxuu go'aan ka gaari doonaa haddii codsiga arjiilaha uu ku jiro ujeedada laga leeyahay arrimaha Sharciga Dabka ee Guddiga Racfaanada loo ogol yahay in ay tixgeliyaan. Si loo gaaro go'aankaan, Madax FCAB wuxuu la tashan doonaa arjiilaha iyo Hirgelinta Sharciyada Dabka labadaba.
 4. ***Xulashada xubnaha Guddiga Racfaanada:*** Xubnaha Guddiga Racfaanka waxaa la xuli doonaa muddo shan maalin oo shaqo gudahooda laga bilaabo waqtiga Madaxa FCAB uu helo codsiga qoran uu arjiilaha ku dalbado Hirgelinta Dabka. Doorashada xubnaha Guddiga Racfaanka waxay waafaqsan tahay Sharciga Magaalada Seattle No. 119799, kaasoo sharciyeyay in ugu yaraan shan xubnaha FCAB ahaan karaan Guddiga Racfaanada, lana raaciyo hal wakiil oo ka socda ganacsiga/warshadaha, hal wakiil oo ka socda aqoonyaanada/farsamada, iyo hal wakiil oo ka socda muwaaadiniinta. Waxaa dhici karto in la doorto xubno kale oo dheeraad ah taasoo ku xiran marka loo baahan yahay aqoon gaar ah. Si leysaga ilaaliyo qilaaf ka dhasha maslaxadda, lama ogola in arjiile, ama shaqaale ama wakiil ka socda arjiilahaas, in uu ka shaqeeyo Guddiga Racfaanada xagga dib u eegida qilaafka u hoggaansamida arjiilaha (fadlan tixraac Sharciga Asluubta Magaalada Seattle, ee laga helo Qeybta 4.16 Sharciga Dawladda Hoose ee Seattle).
 5. ***Xanibaadda saaran xariirkha dhinacyada la leeyahiin Guddiga Racfaanada:*** Dibadda shirka (shirarka) Guddiga Racfaanada iyo booqashada (booqashooyinka) lagu tago goobta, looma baahna in arjiilaha iyo Waaxda Dabka, labadaba, gaarsiiyan xubnaha Guddiga Racfaanada arrinta ku saabsan ***muranka*** ka taagan u hoggaansamida, marka laga reebo Agaasimaha Horumarinta Sharciga Farsamada FMO (FMO Technical Sharciga Development Director).
 6. ***Ballaminta shirka:*** Guddiga Racfaanada waxay kulmi u

- doonaan in ay fiiriyan muranka u hoggaansamida arjiilaha muddo 15 maalin la shaqeeyo gudahooda laga bilaabo marka Guddoomiyaha FCAB uu doorto. Agaasimaha Horumarinta Xeerka Farsamada wuxuu la xariiri doonaa Madaxa FCAB, xubnaha Guddiga Racfaanka, Waaxda Dabka Seattle iyo arjiilaha in ay qabtaan meel iyo waqt iagu qabto shirka (shirarka) Guddiga Racfaanada.
7. ***Wararka qoran iyo sawirada:*** Arjiilaha iyo Waaxda Dab Seattle (Seattle Fire Department) wuxuu mid kasta soo gudbin doonaa oraah qoran oo kooban kuna saabsan arrinta (arrimaha), xaqiiqada iyo qeybta (qeybaha) Sharciga Dabka Seattle (Seattle Fire Code) ee ku lugta leh Agaasimaha Horumarinta Sharciga Farsamada (Technical Code Development Director) ugu yaraan todobo maalin la shaqeeyo ka hor inta aan la gaarin taariikhda shirka Guddiga Racfaanka (Appeals Board) kowaad si loo tixgeliyo muranka ka taagan u hoggaansamida. Wararkaan waa in lagu soo daro warqadaha la xariira sida qorshaha, iyo liiska marqaatiyada aqoonta u leh. Arjiilaha iyo Waaxda Dabka waa in ay hal koobi oo ku saabsan oraahyadooda iyo lifaaqyada u gudbiyaan xubin kasta oo ka tirsan Guddiga Racfaanada, iyo sidoo kale waa in ay koobi dheeraad ah u gudbiyaan dhinaca kale. Agaasimaha Horumarinta Sharciga Farsamada waxaa loo geyn doonaa koobiyada ugu yaraan saddax maalin la shaqeeyo ka hor inta aan la gaarin shirka Guddiga Racfaanada.
 8. ***Shirka:*** Guddiga Racfaanada wuxuu dooran doonaa qofka madaxa u ah. Arjiilaha ayaa horta soo bandhigi doono, kaddibna waxaa ku xiga Waaxda Dabka. Arjiilaha iyo Waaxda Dabka waa in mid kasta uu 30 daqiqi ku soo koobo bandhigga afka, kuna jiraan su'alaha Guddiga Racfaanada, haddii Madaxa Guddiga Racfaanada uusan go'aan ku gaarin horaanta shirka in loo baahan yahay waqt iheeraad ah. Wax kasta oo dhaca, dhinac kasta waxaa la siin (U gudub bogga xiga) doonaa waqt isla'eg ay bandhigeeda u soo jeediso Guddiga Racfaanada. Bandhiga afka, dhinac kasta waa in ay ka hadasho xaqiiqada, arrimaha iyo qeybaha Sharciga Dabka Seattle ee ku lugta leh. Dhinac kasta waxay ku soo dari karaan aqoonyahanada handasada ama dad kale marka ay u

- soo bandhigaan Guddiga Racfaanada.
9. ***Booqashada goobta:*** Guddiga Racfaanada waxay booqashada goobta (goobaha) ku lugta leh muranka u hoggaansamida, kaddib marka ay ka codsadaan Waaxda Dabka ama arjiilaha, ama marka Guddiga Racfaanada uu iskiisa ugu dhaqaao. Arjiilaha wuxuu goobta (goobaha) u diyaarin doonaa Guddiga Racfaanada si ay u soo booqashada goobta (goobaha). Booqashada (booqashoooyinka) waxaa loo mari doonaa Agaasimaha Horumarinta Sharciga Farsamada. Lama samayn karo booqashada (booqashoooyinka) noocaas ee lagu tago goobta haddii uusan joogin wakiil ka socda Waaxda Dabka iyo arjiilaaha labadaba.
10. ***Talooyinka Guddiga Racfaanka:*** Muddo shan maalin la shaqeeyo gudahooda laga bilaabo shirkeeda ugu dambeeyo ama booqashada goobta ee ku saabsan muranka u hoggaansamida, Guddiga Racfaanka wuxuu Madaxa Dabka u soo jeedin doonaa talooyin qoran oo ku saabsan xaaladda u hoggaansamida gaarka ah. Koobiga talooyinka Guddiga Racfaanada waxaa la siin doonaa arjiilaha, Guddoomiyaaha FCAB, iyo xubnaha kale ee FCAB. Dib u eegida Guddiga Racfaanka iyo talooyinka la-tallinta waa in la dhamaystiro muddo 60 maalin isku xiga gudahooda laga bilaabo waqtiga Madaxa Dabka (Fire Chief) ogeysiyo arjiilaha go'aanka ka horeeyo racfaanka ee Madaxa, inkastoo la qaadan karo waqt badan haddii arjiilaha iyo Hirgelinta Sharciga Dabka (Fire Marshal) ku heshiyan in la dheereeyo waqtiga.

Talooyinka Guddiga Racfaanada waa la-tallin oo keliya, ee ma aha in ay gacmaha ka xiraan Waaxda Dabka Seattle. Haddii Madaxa Dabka diido talooyinka Guddiga Racfaanada, Madaxa Dabka wuxuu qoraal ahaan ku soo sheegi doonaa asbaabta. Koobiga oraahdaan waxaa la siin doonaa arjiilaha, xubnaha FCAB, Xafiiska Duqa Magaalada iyo xubinta Guddiga Magaalada ee guddoomiyaha ka ah Guddiga Ammaanka Dadweynaha ee Guddiga Magaalada. Kiis kasta, Madaxa Dabka iyo Guddoomiyaha Dabka waa in ay diyaar u yahiin in aay la kulmaan arjiilaha kaddib marka la soo gabogabeeyo dib u eegida Guddiga Racfaanaada.

Macluumaad Dheeraad ah

Su'aalaha guud ee ku saabsan hawsha Guddiga

Racfaanada waa in loo jeediyo Agaasimaha Horumarinta Sharciga Farsamada ee Xafiiska Hirgelinta Sharciyada Dabka (206) 386-1450.

Talooyinka guud ee loo jeediyo FCAB xagga isbaddalada Sharciyada Dabka waa in loo gudbiyo qoraal ahaan laguna gudbiyo foom laga heli kaaro Agaasimaha Horumarinta Sharciga Farsamada.